

Tilmaamaha bukaanka

Shaybaadhka kaadida - koobka ururinta iyo sirinjaha kaadida

WAXAN AYAAD U BAAHANTAHAY


Koobka ururinta iyo caag (caag-yare) kaadida ee uu ku siiyay daryeelbixiyuhu.

Koobka ururinta waa la faaruqiya oo la tuuraa ka dib marka la dhamaystiro saambalka.

SIDAN SAMEE



Qaaditaanka saambalka kahor waa in aadan kaadi tagin 4 saacadood.




Marka Saambalka la qaadayo:


Dumar : Kala qabo dabnaha siilka.

Haddii dhiig ama dareere yimaado waxaad galisaa tamboong siilka saambalka ka hor.

Rag: Buuryada dib u celi.



- 1) Daboolka ka fur koobka.
- 2) Waxoogaa marka hore ku kaadi musqusha.
- 3) Koobka ku kaadi oo kala badh gaadhsii.
- 4) Musqusha ku dhamaystir kaadida.
- 5) Daboolka ku xidh koobka.



Ka qaad xabagta daboolka.

caaga ku foorari, oo dhinaca daboolka horreysii.


Caaga kaadida ayaa ka buuxsamaysa.

Ku hay ilaa inta ay ka buuxsamayso.




Ku calaamadee caaga personlambarkaaga oo idil, magaca, taariikhda iyo wakhtiga. Isticmaal sumadda uu ku siiyay daryeelbixiyagaagu.

Sumadda ku dheji caaga dhererkiisa.



Ku kaydi caaga tallaajada ama bac baraf ku jiro.



U gudbi caaga daryeel bixiyahaaga ugu danbayn maalinta aad qaaday saanbalka. Ku qaad caaga bac baraf ku jiro.

Soo qaado kaadh aqoonsi oo sax ah.